



HM Government

Grenfell
community

updates

Grenfell Tower community update: July 2026 - Somali / Af-Soomaali

Xogaha cusub ee bulshada Grenfell Tower: Luulyo 2026

Waxaan aqoonsanahay in Grenfell Tower uu muhiimad qoto dheer u leeyahay dadka ay saameysay masiibady, iyo in dhulkaas oo muhiimad gaar ah ugu fadhiyo qoysaska.

Waxaan dooneynaa inaan kula socodsiiino wixii ka cusub shaqadeena inta aan sida taxadarka ah u duminayno Dhismaha.

Xogtaan cusub waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan ka heli kartaa:

- **Qorsheynta codsiga**
- **Badelka waxyaabaha lagu duubay Dhismaha**
- **La socoshada xogaha ku saabsan busta, gariirka iyo qaylada**
- **Taageerada caafimaadka iyo badqabka guud**
- **Sida naloola hadlo ama sida loo helo xog dheeraad ah**

Waxaad xogihii hore ka arki kartaa: www.gov.uk/grenfell-community-updates

Badelka waxyaabaha lagu duubay Dhismaha

Baanarada wadnaha u eg ee saaran Grenfell si taxadar leh ayaa looga saaray Dhismaha kadib sanad-guurada sagaalaad ee masiibada meel ayaana si fiican loogu kaydiyay. Waxyaabaha lagu duubay dhismaha ee cadcad ee ka dambeeyay bannaanada si ay gacan uga geystaan ilaalinta Dhismaha ugana hortagaan dabeysha, hadda waa la saaray.

Qorsheynta codsiga

Shaqada sida taxadarka ah loogu burburinaayo Grenfell Tower waxa la bilaabay sanadkii hore iyadoo la adeegsanayo nooc ka mid ah oggolaanshaha qorsheynta oo la yiraahdo Dhismaha La Oggolyahay, kaas oo soconaya 12 bilood. Shaqada hartay, waxaan soo gudbinay codsi iyada oo la adeegsanayo nidaamka qorsheynta ee Crown Development. Tani waa tallaabo caadi ah oo ku xigta nidaamka shaqada mana badesho sida shaqadu u socoto.

Waxaad codsiga ka akhrin kartaa:

[CROWN/2026/0000003 - Dhukumiintiyada – Hel Codsiga Crown Development](https://www.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment_data/file/600003/CROWN/2026/0000003_-_Hel_Codsiga_Crown_Development.pdf)

Nidaamkaan waa mid ka madaxbanaan codsiga qorsheynta oo dhici doona goor dambe sanadkaan lana xariira Xusuusta Dhismaha Grenfell, kaas oo la soo gudbin doono kadib nidaamka naqshadeynta ee bulshada hogaaminayso oo ay maamusho Freehaus.

La socoshada xogaha ku saabsan busta, gariirka, iyo qaylada

Dawlada waxaa ka go'an in la hubiyo in dhammaan shaqada ka socota goobta Grenfell

Tower lagu fuliyo heerarka ugu sarreeya ee shaqo. Badqabka iyo badbaadada bulshada iyo dadka ka shaqeeya goobta ayaa weli ah mudnaanteena leh. Waxaa goobta yaala kormeerayaal soo uruurinaya xog toos ah oo ku saabsan boorka, gariirka, iyo qaylada. Xogta waxaa la daabacaa bil kasta. Si aad u aragto warbixinadii ugu dambeeyay, fadlan guji lifaaqyada hoose:

[Warbixinta la socoshada boorka 4 Maayo ilaa 31 Maayo 2026](#)

[Warbixinta la socoshada gariirka 4 ta Maayo ilaa 31 Maayo 2026](#)

[Warbixinta la socoshada qaylada 4 Maayo ilaa 31 Maayo 2026](#)

Hay'ada Amniga Caafimaadka ee Ingiriiska (UK Health Security Agency, UKHSA) waxay sii wadi doontaa qiimeynta iyo kormeerka tayada hawada ee aagga ku dhow Grenfell Tower inta shaqooyinku socdaan. Waxay soo saartaa warbixinadeeda bil kasta. Waxaad ka eegi kartaa warbixintii ugu dambeysay halkaan:

[La socoshada hay'ada kadib dabkii Grenfell Tower - GOV.UK](#)

Taageerada caafimaadka iyo badqabka guud

Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof, Adeegga Caafimaadka iyo Badqabka Grenfell waa adeeg NHS oo bilaash ah oo qarsoodi ah oo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn. Taageerada wali waa la heli karaa waxaana loogu talagalay qoysaska ay dadku ka geeriyooddeena, dadka masiibada ka badbaaday, iyo dadka deggan meelaha u dhaw inta lagu jiro shaqada si taxaddar leh loogu duminaayo Grenfell Tower. Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof, waxaad:

- Wici kartaa Adeegga Badqabka Grenfell oo laga wici karo lambarkaan 020 8637 6279 (8subaxnimo ilaa 8habeenimo, maalin kasta).
- Wici kartaa khadka tallo bixinta xaalada degdega ah ee North West London NHS Foundation Trust's (CNWL), ee laga wici karo: 0800 0234 650 (furan 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii).
- limaylka: grenfell.wellbeing@nhs.net
- Booqo: www.grenfellwellbeing.cnwl.nhs.uk si aad u hesho xog dheeraad ah.

Si aad u hesho xogihii u dambeeyay ee ku saabsan adeegyadaan, booqo

www.grenfell.nhs.uk

Sida naloola hadlo ama sida loo helo xog dheeraad ah

Waxaan dooneynaa inaan xogaha kugula wadaagno qaab ugu habboon. Waxaan sii wadi doonaa inaan ku wadaagno xogaha iyo macluumaadka joogtada ah:

www.gov.uk/grenfell-community-updates

Fadlan iimayl noogu soo dir halkaan: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk si aad:

- U diyaariso jadwal aad nagula hadasho, ama la xiriir qandaraaslaha ugu weyn ee goobta Grenfell Tower, DCUK.
- Noo waydiiso su'aal kasta oo aad qabto ama nala wadaag wax walba oo aad ka walwalsan tahay oo ku saabsan shaqada sida taxadarka ah loogu duminaayo Dhismaha.
- limayl noogu sheegto xogaha caadiga ah ee adiga kugu socda.
- Noola wadaagto fikirkaaga ku saabsan sida aan ula hadalno kuula hadalno, haddii aad jeclaan lahayd. Waxaan soo dhaweynaynaa aragtidaada.

Si aad u hesho xogihii ugu dambeeyay ee Grenfell Tower, iyo si aad iskaga diiwaangeliso fariimaha iimaylka, fadlan booqo: www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee koodhka QR-ka.

